# FOOMKA OGGOLAANSHIYAHA FARRIIMAHA QORAALKA AH EE MACMIILKA

**CLIENT TEXT MESSAGING CONSENT FORM**

**Magaca Qofka:** **Taariikhda Dhalashada:**

KHATTARTA ISTICMAALKA FARRIIMAHA QORAALKA AH

Farriimaha qoraalka ahi waxa ay leeyihiin tiro khattarto ah taas oo ay tahay in macmiilku uu tixgeliyo. Kuwan waxaa kamid ah, balse aan ku ekayn kuwan soo socda:

- Farriimaha qoraalka ahi ma aha kuwo sir ah (encrypted)
- Farriimaha qoraalka ah waa la wareejin karaa ama waa lasii diri karaa waana la keydin karaa
- Farriimaha qoraalka ah waxa ay ku hagaagi kartaa oo heli kara dad aan loogu talo gelin
- Dirayaasha farriimaha qoraalka ah waxa ay si qalad ah ugu diri karaan si fudud farriimaha qoraalka ah
- Koobbiyo kayd ah (back-up) oo farriimaha qoraalka ahi waa ay jiri karaan xattaa haddii diraha ama loo diruhuba uu baabiiyo koobbigiisa ama koobbigeeda
- Shaqo-geliyeyaashu waxa ay xaq u leeyihiin inay eegaan farriimaha qoraalka ah ee markaasi lagu diro taleefannada shaqo-geliyeyaasha
- Farriimaha qoraalka ah waxa loo isticmaali karaa caddeyn ahaan marka ay maxkamada noqoto
- Farriimaha qoraalka ah waxa ay hoos tagi karaan codsiyada diiwaannada dadweynaha

SHURUUDAHA ISTICMAALKA FARRIIMAHA QORAALKA AH

- Farriimaha qoraalka ahi ma aha kuwo ku habboon xaaladaha degdegga ah ee qofka naftiisa khattarta gelinaya
- Shaqaalaha Caafimaadka Habdhaqaneed ma aha inay diraan Xog Caafimaad oo Ilaashan iyaga oo isticmaalaya farriimaha qoraalka ah
- Macmiishu waa inay iska ilaaliyaan inay u diraan xog shakhsi ah Gobolka Multnomah iyagoo isticmaalaya farriinmaha qoraalka ah
- Farriimaha qoraalka ah ee loo diro ama laga helo macmiil waxa laga yaabaa inay u baahato in uu ku qoro shaqaalaha Caafimaadka Habdhaqaneed diiwaanka adeegyada macmiilka sida ku habboon iyagoo markaasi raacaya shuruudaha ku keydinta diiwaanka
- Macmiilku waa inuu ogaysiiyo Gobolka Multnomah isagoo qoraal ku ogeysiinaya haddii lambarka taleefankiisa ama taleefankeeda gacantu isbeddelo
- Macmiilku waa inuu ogeysiiyo Gobolka Multnomah isagoo qoraal ku ogeysiinaya haddii isagu/iyadu aanu doonayn in uu ka helo farriimo qoraal ah Gobolka Multnomah
- Macmiilku waxa uu ka mas'uul yahay inuu ilaaliyo taleefankiisa/taleefankeeda gacanta ama siyaabaha kale ee marin loogu heli karo farriimaha qoraalka ah Gobolka Multnomah masuul kama aha ku xadgudubka qarsoodida tanoo uu sababay macmiilku ama dhinac saddexaad
- Macmiilku waa inuu iska ilaaliyo u isticmaalka taleefanka shaqo-geliyihiisa/shaqo-geliyeheeda inuu uga diro ama kaga helo farriimo qoraal ah Gobolka Multnomah

AQOONSIGA IYO HESHIISKA MACMIILKA

Waxa aan aqoonsanayaa inaan akhriyay si buuxdana ufahmay xogta Gobolka Multnomah ay isiisay tan oo khussaysa khattaraha ka iman kara isticmaalka farriimaha qoraalka ah. Waxa aan oggolaaday shuruudaha kor ku xusan, waxaanan

# FOOMKA OGGOLAANSHIYAHA FARRIIMAHA QORAALKA AH EE MACMIILKA

**CLIENT TEXT MESSAGING CONSENT FORM**

fahmay in Gobolka Multnomah uu soo rogi karo shuruudo kale oo khusseeya isticmaalka farriimaha qoraalka ah mustaqbalka.

| | |
|---|---|
| Saxeexa macmiilka / masuulka | Taariikhda iyo Waqtiga Saxeexa |
| Cinwaanka Iimaylka Macmiilka/Masuulka | Lambarka Taleefanka Gacanta ee Macmiilka/Masuulka |
| | Macmiilka/Masuulka Sitaha Taleefanka Gacanta |
| BHD Staff Member Name | BHD Program |